



Ku soo dhowow Waaxda Gurmada Degdegga ah ee Isbitaalka Carruurta ee Perth

Waxaan halkan u joognaa inaan ka caawino ilmahaaga inuu helo daryeelka ay u baahan yihiin.

Waxaan daryeelnaa carruurta da'doodu tahay 15 ama ka yar ee leh xaalad caafimaad ama caafimaad maskaxeed oo degdeg ah. Waa u lacag la'aan muwaadiniinta Australian ka ah ama dadka wadanka degan ee deganaanshaha leh.

Isbitaalka Carruurta ee Perth waxaa kaloo loo yaqaan PCH. Waaxda Gurmada Degdegga ah waxaa kaloo loo yaqaan ED



Adeegga turjubaanka

Codso turjubaan haddii aadan fahmin luuqadda ingiriiska ama si lagaaga caawiyo inaad nala hadashid. Adeegga waa lacag la'aan.

Waqtiyada sugitaanka

Mashquul ayaad kala kulmi kartaa Waaxda Gurmada Degdegga ah iyadoo carruur badan oo xanuunsan ay sugayaan in la arko. Carruurta xaaladoodu ugu darran tahay ayaa marka hore la arkayaa. Sida loo kala hormarayo iyo wakhtiyada sugitaanku waa isku mid haddii aad ku timaadid ambalaas.

Fadlan noo sheeg haddii aad qorsheyneyso inaad baxdo intaan daweyn ilmahaaga kahor.

Maxaa ka dhaca Waaxda Gurmada Degdegga ah



Mudnaan-siinta (Triage)

Triage wuxuu ka caawiyaa shaqaalaha inay go'aansadaan sida ugu dhakhsaha badan ee ilmahaagu u baahan yahay inuu dhakhtar u arko. Waxay eegi doonaan ilmahaaga waxayna ku weydiin doonaan su'aalo.



Sug inta lagaa arkayo

Waxaad gudaha u geli doontaa Waaxda Gurmada Degdegga ah si aad u sugtid kalkaalisada ama dhakhtar si uu u arko ilmahaaga. Karraaniga (clerk) ayaa ku weydiin doona su'aalo ah inta aad sugayso.



Waxaa arki doona kalkaalisada ama dhakhtarka

Waxay weydiin doonaan su'aalo waxayna eegi doonaan ilmahaaga si ay u fahmaan waxa ka khaldan.



La hadal kalkaalisadaada ama dhakhtarkaaga

Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa kuu sharixi doona waxa qaldan iyo waxa uu ilmahaagu u baahan yahay. Mar walba na weydii su'aalaha.



Baaritaanada iyo daaweynta


Ilmahaagu wuxuu u baahan karaa baaritaan dhiig, raajo, ama baaritaano kale si loo ogaado waxa khaldan. Waxay kaloo heli karaan daaweyn inta ay ku sugan yihiin ED. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo inaad sugtid inta lagu jiro waqtigan



Sug inaad baxdo ama joog si aad u hesho daaweyn dheeraad ah

Dhakhtarkaaga ayaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu u kuur galo ilmahaaga si loo hubiyo inaysan ka sii darin ama uu arko ka-falceinta daawada la siiyay. Wixii sharaxaad ah waxaad heli doontaa intaadan bixin kahor. Haddii loo baahdo in ilmahaagu joogaan si ay u helaan daryeel dheeraad ah, waxaa loo wareejin doonaa qol kale oo isbitaalka ah.

La kulan kooxdaada daryeelka caafimaadka: waxaa jira dad badan oo qeyb ka ah caawinta daryeelka ilmahaaga



Haddii aad is leedahay ilmahaagu wuu xanuunsan yahay

Fadlan la hadal kalkaaliso caafimaad oo qiimeyn doonta xaalada ilmahaaga isla markaasna qabanqaabin doonta wixii ku habboon oo xanuun jabiye ah.

Ma welwelsan tahay? Waxaan u baahanahay inaan ogaano.



Haddii ilmahaagu u muuqdo mid jirran ama u dhaqmaya si aan caadi ahayn, isla markiiba noo sheeg. Adiga ayaa naga yaqaan ilmahaaga. Waan ku dhagaysan doonaa.

Haddii aadan Ingiriis fiican aqoon waxaad dhahdaa 'Emergency Waiting Room' or just say your room number.(ama sheeg lambarka qolkaaga uun).



Aadista guriga

Marka ilmahaagu u diyaar garoobo in guriga loo kaxeeyo, dhakhtarka ama kalkaalisadu waxay ku siin doonaan xog ku saabsan waxa loo baahan yahay inaad samayso si aad u daryeesho ilmahaaga. Fadlan na weydii wixii su'aalo ah oo aad qabtid. Waxa kale oo laga yaabaa inaan ku siinno warqad aad u qaadan kartid dhakhtarka xaafaddaada.

Markaad guriga joogto

Raac tilmaamaha uu dhakhtarku ku siiyo. Haddii aad ka walwalsan tahay in ilmahaagu uusan soo raynayn, waxaad:

- booqataa dhakhtarka xaafaddaada;



- ka wacdaa Caafimaadka Tooska ah 1800 022 222; ama
- booqataa GP -ga Daryeelka Degdegga ah.

Haddii ay tahay xaalad degdeg ah, wac 000 ambalaas ama ku soo laabo Waaxda Gurmada Degdegga ah.

Wax badan ka ogow wakhtigaaga PCH

Booqo bartayada internetka pch.health.wa.gov.au ama weyddii mid ka mid ah shaqaalaha wixii ku saabsan:



- baarkinada baabuurta la dhigto (xusuusnow inaad ka qaadid baabuurkaaga aagga 'deg -degga ah' oo aad dhigatid baarkinada caadiga ah)
- musqulaha, meelaha la isticmaali karo, meelaha waalidiinta iyo miisaska xafaayadaha iyo dharka looga badalo carruurta
- cunto iyo cabitaan
- warcelin, bogaadin iyo cabashooyin
- Wi-Fi PCH-ga bilaashka ah (Shabakadda HEALTH-Guest, looma baahna password).

Gobolka Western Australia, Adeegga Caafimaadka Carruurta iyo Dhalinyarada. Ref.no 1416. © CAHS 2021.

